




KNOW YOUR RIGHTS

As an Employee

- Waxaad xaq u leedahay aaminaada iyo ku camal-falka diintaada sida, inaad gadh la baxdo, hesho fasax aad ku tukato, xidhato xijaabkaaga iyo inaad u baxdo Salaadda Jumcaha oo uu qofka ku shaqaalaysiiyay kuu suure geliyo.
- Qofka aad u shaqaynaysaa waa inuu hubiyo in aanad la kulmin aflagaado ka dhan ah Muslim ahaanshahaga, caga-juglayn amase diin beddel dalbid xad dhaaf ah.
- Waa sharci darro in qofkaad u shaqaysaa kaa aargoosto marka aad ka buuxiso cabasho takoorid.
- U soo sheeg CAIR cunsurinmada iyo cago-juglaynta ka dhex qabsata goobta shaqada.

KOOBAN



KNOW YOUR RIGHTS

As an Employee

MACLUUMAADKANI MAAHA IN LOO TIXGELIYO TALO SHARCI.



WWW.CAIR.COM



Council on American-Islamic Relations

OGOW XUQUUQDADA SHAQAALE AHAAN

Koox Xuquuqeedka Todobaad (Title VII), Xeerka Xuquuqda Madaniga ee 1964 wuxuu ka hortagaya shaqaalaysiinta cunsurinimo ee ku dhisan isir, diin midab, halkaad dhalasho ahaan ka soo jeedo iyo jinsigaaga ee ay sameeyaan qaybaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba kuwaas oo haysta shaqaale ugu yaraan ah 15. Koox Xuquuqeedka Todobaad (Title VII) waa sharci heer federal ah oo ku dabaqmaya dhammaan waddanka. Gobolkaaga waxa laga yaaba inuu leeyahay sharci la mid ah ama ku darayaa ilaalin dheeraad ah oo hoos imanaya sharcigan. Caawinta sharciga ee heer gobol eeg cutubka CAIR ee madaniga.

KOOX XUQUUQEEDKA TODOBAAD (TITLE VII), WUXUU KUU DAMAANAD QAADAYAA INAAD:

- + **Ogolaansho diimeed oo macquul ah hesho:** Loo shaqeeyuhu waa inuu si macquul ah u aqbaloo aaminaada iyo ku camal-falka diimeed ee shaqaalihiiisa hadii aanay aqbalaadani sababayn culays daran oo ku imanaya shaqada ganacsigiisa. La'aanta aqbalaadiisa ee aaminaada iyo ku camalfalka diinta ee shaqaalihiiisu waxay noqonaysa takoor dhinaca shaqaalaysiinta ah. 'Ku camal falka shaqo' waxa ka mid ah in lagu ogolaado inaad gadh yeelato, lagu siiyo waqti aad ku tukato, u bixi karto Salaadda Jimce ama xidhato xijaab.
- + **Caddaalad ka hesho shaqaalaysiinta, eryidda, iyo dallacsiinta:** Qofka aad u shaqayso waa ka mamnuuc inuu u eego diin marka uu go'aan ka gaadhayo xaaladaada shaqaalaysiinta.
- + **Hesho degaan shaqo oo aan cadaawad lahayn:** Qofkaad u shaqaysaa waa inuu hubiyo inaanad la kulmin aflagaado Muslimka lagag soo horjeedo, caga-juglayn amase dalab diin baddalined oo aan loo baahnayn xad dhaafna ah.
- + **Ka cabato takoorid adiga oo aan ka baqayn aargoosi:** Sharciga Federaalku wuxuu kuu ogolyahay inaad soo sheegto takoor kasta oo shaqo la xidhiidh. Waa sharci darro in qofka aad u shaqayso kaa aargoosto markaad ka cabato takoor.

MARKA AAD LA KULANTO TAKOOR SHAQADA AH:

- + Ahaw mid deggan oo edeb leh.
- + Ka warbixi cidda aad filayso in falalkoodu ay yihiin takoor.
- + U soo gudbi falalka takoor maamulka shirkadda iyagoo qoraal ah.
- + Bilow inaad diiwaan gashato falalka takoor adigoo waraaqo ku qoraya, Kaydinayana liis tafatiran, qorayana markhaatiyada joogay iyo cabashadaba. Hubi inaad ka haysato nuqul shay kasta. Waa muhiim inaad haysato "raadraac waraaqaysan" oo caddaymo ah.
- + Ha saxeexin wax waraaq ah ama ha is casilin adiga oo aan la tashan abukaate.
- + La xidhiidh CAIR si aad warbixin u soo gudbiso.

